

## **Baaqa Mombasa ee Mabadi'ida Nabadda**

In ka badan 180 ergey oo ka mid ah Bulshada Rayidka ee Soomaaliyeed ayaa ku kulmay magaalada Mombaasa ee dalka Kenya muddadi u dhexaysay 7<sup>da</sup> ilaa 11ka Diseembar 2009, waxayna isku raaceen mabaad'ida nabadda ee hoos ku cad.

### **I. Aragaxinta looma adeegsankaro aalad siyasadeed**

Aragaxinta dadka rayidka ah marmarsiinya uma noqon karto higsashada hindisayaal siyaasadeed oo dadka Soomaaliyeed ay ka soo gaarayso cawaaqib xumo. Argagaxu meelna kama soo galo dhaqanka iyo hiddaha Soomaalida iyo hab-nololeedkoodaba.

### **II. Ammaanku wa xaq oo leeyahay uu leeyahay qof kasta.**

Qofna lama dilikaro ayada oo lagu marmarsiinayo sugidda ammaanka. laguma xad-gudbi karo nolosha, xorriyadda, iyo u madaxbannaanida aragtida qofna.

### **III. Shareecada Islaamku waa asalka sharciyada dalka**

Shareecada Islaamku waxay mar walba ahayd tiirhexaadka nolosha dadka Soomaaliyeed, sidaas awgeedna waxay ahaanaysaa asalka sharciyada dalka iyida oo lagu kaabayo sharciyada caalamiga ah, sida Sharciga Caalamiga ah xuquuqda Aadanaha iyo Axdiga Jenefa.

### **IV. Xoojinta Hay'adaha jira**

Si looga gudbo xaaladda ku meelgaarka ah ee joogtada noqotay, waa in la aqoonsado, la dhawro dadaallada ay gaareen degaannada iyo gobollada dalka lagana sii ambaqaado.

### **V. Baahida loo qabo hoggaan**

Dadka Soomaaliyeed waa inay curiyaan hoggaan leh himilo dhalinkarta hiyi isbeddel, si looga baxo xaaladda ku meel-gaarka ah ee lagu negaaday.

### **VI. Baahida loo qabo dawlad leh himilo waddani ah**

Dawladdu waa inay ahaato mid loo dhanyahay, dimuqraaddi ah, karti leh, isla markaasna ka tarjumaysa himilo waddani oo suurta gelinaysa xoojinta kartida hay'adaha kumeelgaarka ah ee hawlowlaha u ah geedi-socodka soo kabshada.

### **VII. Gargaarka beni'aadamiga ah waa inaan la hor-is-taagin**

Looma dulqaadan karo in dadka Soomaaliyeed si tartiib- tartiib ah loogu dabargooyo dalka gudhiisa iyo dibaddisaba. Si loo dhawro muqaddasnimada nafta isla markaasna

loogu gargaaro dadka nugul, dhinacyada oo dhammi waa inaanay hor-is-taagin dadaalka hay'adaha caalamiga ah iyo kuwa waddaniga ah ee la xariira gargaarka bani'aadamiga ah.

### **VIII. Ilaalinta deegaanka**

Xaalufinta khayraadka dabiiciga ah ee Soomaaliya, bad iyo berriba, waxay halis gelinaysaa mustaqbalka dadka Soomaaliyeed. Sidaas awgeed ilaalinta deegaanka waa in la siiyaa mudnaan.

### **IX. Joojinta dhaqanka lunsashada hantida dadweynaha**

Hantida loogu talagalo hay'adaha ku meelgaarka ah iyo dhinacyada kaleba waa inaan la lunsan, la maamul xumayn, loona adeegsan ujeedooyin aan loogu talagelin.

### **X. Beesha Caalamku waa inay xoojiso nidaamka ee aanay shakhsiyaad bartilmaameedsan**

Beesha caalamku waa inaanay shakhsiyaad ka doorbidin xoojinta hay'adaha. Waa in la taageero arrimaha mudnaanta u leh dadka Soomaaliyeed. Barnaajiyada dibad-joogga ee ay caawiso beesha caalamku waa in loo dejiyo qorshe dalka gudhiisa loogu rarayo taasoo qayb ka noqonaysa wax ka beddelidda siyaasadda beesha caalamka ee Soomaaliya ku aaddan.

### **XI. La xisaabtanka ku jawrfalayaasha xuquuqda Aadanaha**

Qof kasta oo geystay jariimo waa lagula xisaabtamo. Beesha caalamku waa inay dadka Soomaaliyeed ka gargaarto sida looga bixi laha dhaqanka isu-raacasha la'aanta dembiyada.

### **XII. Qaddarinta dhaqanka Soomaalida**

Dhaqanka Somaaliyeed waa astaanta dalka iyo dadkaba, sidaas awgeed waa in la dhowro lana hormariyo.

*Soo baxay 11 Diseembar, 2009  
Mombasa, Kenya*